

For Office Use Only: Parcel # _____ Assessment Year: _____
 Verified by/Date: _____ Posted by/Date: _____ Full Yr MY

Application for Owner Occupied Homestead Classification

Codsiga Tilmaan Guri Koobaad Qoys uu Deganaa Yahay Mulkiile

Fadlan akhri warqadda hordhaca ah ee foomkan ka hor inta aanad buuxin. Waa in aad leedahay oo aad deganaa tahay hantida ama guriga 2-da Bisha Koobaad ama 1-da Bisha Laba iyo Tobnaad, isla markaana waa in codsiga loo soo celiyo xafiiska qiimeeyaha ugu dambeyn 15-ka Bisha Laba iyo Tobnaad si ay kuugu banaanaato cashuurta loogu talagalay tilmaanta guri koobaad qoys (homestead classification) sannadka soo socda. **Haddii aad ka soo bixi waydidd soo buuxinta codsiga waxa ka iman kara tilmaan guri koobaad goys oo kala dhiman (fractional homestead) ama in hantida lagu sharaxay Qaybta 1 loo diido tilmaanta guri koobaad qoys.**

Hadalo been ah oo lagu sheego codsigan waxay ka soo horjeedaa sharciga. Xeerarka Minnesota, qaybta 609.41, ayaa sheegaya in qof kasta oo bixiya war been ah si uu uga baxsado ama u yareeyo waajibkiisa cashuurta la saari doono ganaax ah ilaa \$3,000 iyo/ama hal sanno oo ah xadhig.

Qaybta 1 – Warka Hantida

Qaybta waxa buuxinaya dhamaan codsadeyaasha. Fadlan bixi warka soo socda ee la xidhiidha hantida aad leedahay ee aad ku sheegaysid guri koobaad qoys.

Adreeska hantida _____ Kani ma adreeska aad ku heshid waraaqaha? Haa Maya

Magaalo	Gobol	Fure (Zip)	Degmo
Stearns County			

Aqoonsiga Jagada (Parcel ID) ama sharaxaadda sharci ee dhamaan hantida loo codsanayo ahaansho guri koobaad qoys (haddii aad u baahan tahay meel dheeraad ah oo aad wax ku qortid, fadlan soo raaci warqad gooni ah):

Taariikhda uu yeeshay codsadu	Taariikhda uu degay codsadu	Hantidani ma ku xigtaa hanti kale oo aad leedahay oo imminka haysata tilmaanta guri koobaad qoys? <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya
/ /	/ /	

Qaybta 2 – Gurigii hore

Qaybta waxa buuxinaya dhamaan codsadeyaasha. Fadlan bixi warka soo socda ee la xidhiidha gurigii hore ee aad deganayd.

Adreeskii hore _____

Magaalo	Gobol	Fure (Zip)	Degmo
---------	-------	------------	-------

Taariikhda laga guuray _____ Hantida ma lagu tilmaamay guri koobaad qoys? Haa Maya

Qaybta 3 – Codsadaha/codsadeyaasha sheeganaya in hantida uu tahay guri koobaad qoys

Qaybta waxa buuxinaya codsadaha/codsadeyaasha sheeganaya in hantidu u tahay guri koobaad qoys. Waa in codsade kastaa uu hoos ku qoro magaciisa iyo lambarkiisa sugidda (Social Security) oo ah xuruuf kala go'an, uu ka ka jawaabo su'aalaha, saxeexo, oo uu taariikhda ku qoro codsiga. Marka aan saxeexo hoos, waxa aan cadeynayaa in warka ku yaala foomkan uu run iyo sax yahay intii aan ka warqabo. Waxa kale oo aan cadeynayaa in aan deganaa ahay Minnesota, oo aan deganaa ahay hantida lagu sharaxay Qaybta 1 iyada oo ii ah goobtayda deganaansho ee koobaad.

Degane 1	Magaca dambe	Magaca Koobaad	Dhexe oo xaraf ah	Lambarka sugidda
----------	--------------	----------------	-------------------	------------------

Ma ku qoran tahay warqadda lahaanshaha adiga oo ah mulkiile? Haa Maya

Waa maxay xaaladdaada guur? Kali Guursaday Furis **Haddii aad guursatay**, ma xaaskaaga/ninkaaga ayaa deganaa hantida? Haa Maya

Saxeexa (Deganaa 1)	Tariikh	Lambar teleefon oo maalintii ah
X		

Deganaa 2	Magaca dambe	Magaca Koobaad	Dhexe oo xaraf ah	Lambarka sugidda
-----------	--------------	----------------	-------------------	------------------

Ma ku qoran tahay warqadda lahaanshaha adiga oo ah mulkiile? Haa Maya

Waa maxay xaaladdaada guur? Kali Guursaday Furis **Haddii aad guursatay**, ma xaaskaaga/ninkaaga ayaa deganaa hantida? Haa Maya

Saxeexa (Deganaa 2)	Tariikh	Lambar teleefon oo maalintii ah
X		

Qaybta 4 – War Dheeraad ah

Qaybta waxa buuxinaya dhamaan codsadeyaasha. Fadlan ka jawaab su'aalaha hoose.

Dhamaan mulkiileyaasha ku qoran warqadda lahaanshaha ma waxay codsanayaan guri koobaad qoys? Haa Maya **Haddii ay maya tahay**, fadlan bixi magaca, adreeska, iyo teleefonka maalintii ee mulkiile kasta ee aan deganayn hantida ama guriga (oo ku qor warqad gooni ah).

Qodobada heshiiska maalgalinta ma kalifeen in qof ehel ah lagu qoro warqadda lahaanshaha hantida? Haa Maya **Haddii ay haa tahay**, ma waxa aad tahay qof iibsaday gurigii ugu horeeyay, waxana su'aasha ku jira dadka guur hore soo maray ee guri u iibsanaa qof kali ah markii ugu horeysay? Haa Maya **Haddii ay haa tahay**, fadlan buuxi Ku-darista Codsiga Tilmaan Guri Koobaad Qoys (Addendum to Application for Homestead Classification).

Haddii aad u baahan tahay meel dheeraad ah oo aad ku qortid degane/deganeyaal dheeraad ah, fadlan ku bixi warka warqad gooni ah oo soo raaci codsiga.

Codsiga tilmaan guri koobaad qoys uu degan yahay mulkiile (instructions for application for the owner occupied homestead classification)

Sida loo codsado

Si aad guriga ugu codsatid tilmaanta guri koobaad qoys, waa inaad soo buuxisid codsigan. Si uu kuugu banaanado tilmaanta guri koobaad qoy, waa inaad: (Waa in dhamaan saddexdaba ka soo baxdid)

1. Waa inaad ka mid tahay mulkiileyaasha hantida ee ku qoran codsigan.
2. Waa inaad degan tahay hantida ku qoran codsiga oo ay tahay gurigaaga koobaad.
3. Waa inaad tahay qof degan Minnesota.

Qiimeeyahaaga degmada ayaa go'aamin doona haddii aad tahay degane Minnesota marka la eego ulajeedooyinka guri koobaad qoys. Qodobada la isticmaali karo si loo go'aamiyo xaaladdaada guri koobaad qoys waxa ku jira:

- Ma u diiwaansan tahay in aad cod ka bixisid Minnesota?
- Ma leedahay liisan darawal oo ah Minnesota oo sax ah?
- Ma ka xereysatay Minnesota celin cashuur dakhli (tax return)?
- Guri Minnesota ku yaala ma kuu yahay adreeskaaga joogtada ah ee waraaquhu kuugu yimaadaan?
- Imahaagu, haddii aad leedahay, dugsi ma ka dhigtaan Minnesota?
- Degane ma ka tahay gobol ama wadan kale?

Kama-dambeysta Codsiga

Waa in codsiga guri koobaad qoys la keeno xafiiska qiimeeyaha degmada ugu dambeyn 15-ka Bisha Laba iyo Tobnaad si ay kuugu banaanado tilmaanta guri koobaad qoys marka la eego cashuuraha la rabo in la bixiyo sannadka soo socda.

Warka la Rabo

Xeerarka Minnesota, qaybta 273.124, qayb hoosaadka 13, ayaa raba in lambarada sugidda iyo saxeexada dhamaan mulkiileyaasha degan hantida ama guriga iyo mulkiile kasta xaaskiisa/ninkiisa degan hantida lagu qoro codsigan.

Waxa taa dheer oo la rabaa in xaaska/ninka mulkiile kasta ee degan guriga lagu qoro codsiga guri koobaad qoys xiitaa haddii xaaska/ninka mulkiiluhu aanu mulkiile ahaan ugu qornayn warqadda lahaanshaha.

Haddii warqadda codsiga aanay lahayn meel banaan oo ku filan dhamaan saxeexada iyo lambarada sugidda ee la rabo, fadlan isticmaal warqad dheeraad ah oo soo raaci codsiga.

Sida aanu u isticmaalno warka

Lambarada sugidda ama cadeymaha dhaarsan ama cadeymaha kale ee mulkiileyaasha hanti iyo xaaskooda/ninkooda waa xog asturan. Xeerarka Minnesota, qaybta 273.124, qayb hoosaad 13, ayaa amraya ururinta lambarada sugidda iyo saxeexada dhamaan codsadeyaasha, oo ay ku jiraan xaasaska/nimanka, iyo in lagu qorayo codsiyada guri koobaad qoys.

Qiimeeyaha degmadu waxa uu warka ku jira foomkan la wadaagi karaa hubiyaha degmada, lacag-hayaha degmada, xeer-ilaaliyaha degmada, Guddoomiyaha Dakhliga, ama xafiisyada kale ee federalka, gobolka ama xafiisyada cashuurta ee degmada si loo hubiyo in aad adeecsan tahay barnaamijkan iyo barnaamijyada cashuurta ee kale.

Waad diidi kartaa inaad bixisid warka lagu rabo foomkan. Hase yeeshee, diidmada aad diidid in aad bixisid warkan waxay keeni kartaa tilmaan guri koobaad qoys oo kala dhiman ama diidmo tilmaan guri koobaad qoys.

Ganaaxyo

War been ah oo lagu sheego codsigan waxay ka soo horjeedaa sharciga. Xeerarka Minnesota, qaybta 609.41, ayaa sheegaya in qof kasta oo bixiya war been ah si uu uga baxsado ama u yareeyo waajibkiisa cashuurta lagu ganaaxi doono ilaa \$3,000 iyo/ama ilaa hal sanno oo xadhig ah.

Waxa taa weheliya in ay dhici karto in mulkiilaha guriga laga rabo inuu bixiyo dhamaan cashuurta lagu leeyahay guriga oo ku saleysan tilmaanta guri ee saxda ah oo lagu daray ganaax u dhigma isla qadarkaa. (Xeerarka Minnesota, qaybta 273.124, qayb hoosaadka 13, tuduc h)

Cusbooneysiinta tilmaantaada guri koobaad qoys

Haddii hantidan la siiyo tilmaanta guri koobaad qoys, lagaama rabo in aad tilmaan dib u codsatid.

Hase yeeshee, wakhti kasta, qiimeeyaha degmada ayaa kaa rabi kara in aad keentid codsi dheeraad ah ama cadeyn kale oo laga soo qaaday inay lagama-maarmaan u tahay in la cadeeyo in aad sii wadid sidii uu kuugu banaanaha lahaa tilmaanta guri koobaad qoys.

Haddii aad iibisid, ka guurtid guriga ama beddeshid xaaladdaada guur

Haddii hantidan la iibiyo, adiga ama xaaskaagu/ninkaagu uu beddelo guriga koobaad ee uu degan yahay, ama aad beddeshid xaaladdaada guur, sharciga gobolku waxa kaa rabaa in aad qiimeeyaha degmada ku soo ogeysiisid gudaha 30 maalmood.

Haddii aad ka soo bixi waydo in aad qiimeeyaha degmada ku soo ogeysiisid gudaha 30 maalmood isbeddelka, waxa hantida lagu qiimeeyn karaa cashuurta lagu yeeshay hantida oo ku saleysan tilmaanta hantida ee saxda ah oo lagu daray ganaax u dhigma isla qadarkaa.

Fadlan u soo dir codsiga:

**Stearns County Assessor's Office
705 Courthouse Square, Room 37
St Cloud, MN 56303
320-656-3680**